



# Ururka Macallimiintu Waxay Soo Jeediyeen In La Yareeyo Waxbarashada Ardaydu Dugsiyada Ku Qaadanayso Sanad-dugsiyeedkani

Qoysaska iyo Ardayda Qaaliga ah ee PPS,

Bilowgii sanad-dugsiyeedkani wuxuu ahaa midkii ugu dhibta badanaa marka aad eegto wada jirka waayo-aragnimadeena. Cawaaqibka ka dhasha cudurka faafaya ee COVID-19 wuxuu gaaray qof kasta iyo waliba dhinac kasta oo nolosheena ah. Qaran ahaan Dugsiyada Degmada, oo aan ka mid nahay, waxay wajahayeen shaqaale yaraan taasi oo saameyn weyn ku yeelatay macallimiinteen, ardaydeena iyo bulshooyinka dugsiyadeena. Waxaan sidoo kale ognahay in ka badan 18 bilood ay ardaydeenu waxbarashadoodii ku qaadanayeen guryaha qaabka fogaan-aragga ah, iyadoo waxbarashada ay ardaydu dugsiyada ku qaataa ay tahay ta ugu wanaagsan.

Shalayto, qeyb ka mid ah xuquuqda ay ururku u leeyihiin gorgortanka xaaladaha goobta shaqada, Ururka Macallimiinta Portland (PAT), waxay soo jeediyeen firkarado ay aaminsan yihiin in wax lagaga qaban doono arrimaha saameynaya bulshooyinka dugsiyadeena. Marka la soo koobo, soo-jeedinta ay u soo jeediyeen dugsiyada degmada waxaa ka mid ahaa:

1. **Shirarka Shaqaalaha:** In la yareeyo, wax ka bedel lagu sameeyo ama la joojiyo shirarka shaqaalaha iyo guddiyada aan muhiimka ahayn ilaa lagaga gaarayo sanad-dugsiyeedka soo socda.
2. **Qiimeynta Macallimiinta:** In dib u dhigis lagu sameeyo qiimeynta macallimiinta ilaa laga gaarayo sanad-dugsiyeedka soo socda.
3. **In La Yareeyo Waxbarashada Fasalada Lagu Qaato ee Fasalada Xannaanada ilaa Fasalada 8aad:** In dugsiya la siidaayo 2-saacadood ka hor waqtigii caadiga ahaa ama todobaadka kasta dugsiya la yimaado goor dambe; in waxbarashada dugsiyada ee ardayda laga dhigo lix maalmood ee maalmaha qorsheynta macallimiinta.
4. **In La Yareeyo Waxbarashada Fasalada Dugsiyada ee Dugsiyada Sarre Dugsiya Ku Qaataan:** In laga dhigo todobaadkii maalin ay ardaydu iyagu ay doortaan fasalka ay qaadanayaan, marka ay shaqada qabanayaan, iyo marka ay imtixaanka qaadanayaan; in loo bedelo 3 maalmood oo ardaydu waxbarashada fasalada qaataan ee maalmaha qorsheynta macallimiinta.

Ururka macallimiintu waxay soo jeedinayaan in la yareeyo waxbarashada ay ardaydu fasalada ku qaadanayaan qiyaas in ku dhow 20 maalmood ardayda wax ka barata dugsiyada sarre. Marka la isku soo duubo, ururka macallimiintu waxay sidoo kale soo jeedinayaa in meesha laga saaro qiyaas ku dhow 10 maalmood oo ay ardayda dugsiyada hoose iyo dugsiyada dhexe ay wax baran lahayeen.

**Maadaama aan idin la wadaageyno xaalad degdeg sidii wax looga qaban lahaa saameynta ay ku yeelaneyso waayo-aragnimada macallimiinteena sanad-dugsiyeedkani, ma aaminsanin in si weyn loo dhimo maalmaha ay ardaydu waxbarashada dugsiyada ku qaataan inay tahay dan ardeydeena, qoysaskeena iyo bulshadeena.**

Si kasta ha ahaatee, waxaan heshiis ku nahay muhiimada ay leedahay in la raadiyo sidii xal macquul loogu helo kuwaasi oo ah danta ardaydeena ee sanad-dugsiyeedkani, kuwaasi oo ay ka mid yihiin in la yareyo shirarka aan muhiimka ahayn, sida ay soo jeediyeen ururka macallimiinta.

Waxaan rajeyneynaa inaan si wadno wada hadalada aan la leenahay ururka macallimiinta iyo in aan dib ugu soo martiqaadno macallimiinta fasalada, saaxiibada ku salaysan-bulshada, ardayda iyo qoysaska ay si wada jir u qaabeeyaan xalka arrimaha ka dhigaya sanad-dugsiyeedkani mid adag, ayna ka mid yihiin in laga hadlo xaalada dugsiya, dhisida dareen xoogan oo muujinaya lahaanshaha inay ardaydu leeyihiin dugsiya, iyo abuuritaanka fursadaha in la helo sidii culeyska looga qaadi lahaa macallimiinta sidii loo xoojin lahaa xidhiidhka ka dhexeeya macallimiinteena iyo ardayda.

**Dr. Shawn Bird,**

**Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, Dugsiyada Dadweynaha Portland**